Wax ku soo gadashada kaarkaaga eWIC

Ogow lacagta cuntada ee kuugu hartay WIC

Si aad u fiiriso nooca ay yihiin cuntooyinka WIC ee kuu hartay si aad u gadato bishan, waxaad:

Wici kartaa khadka bilaashka ah ee Adeega Macmiilka:
1-844-234-4946

AMA

Lacagta cuntada ee kuu hartay ka fiiri **ebtEDGE** website-ka:
www.ebtedge.com

AMA

Isticmaal nidaamka lacag la'aanta ah ee **WICShopper** ee la isticmaalo telefoonka gacanta 'smartphone app'*.

AMA

Waxaad xaashidaada risiitka aad wax ku soo gadatay ee u dambaysay ee WIC ka fiirisaa lacagta cuntada ee kuu hartay.

AMA

Waxaad shaqaalaha lacagta qabta 'cashier' ka codsataa in uu kaa caawiyo fiirinta lacagta cuntada ee kuu hartay.

*Soo min guuri 'download' nidaamka la isticmaalo telefoonka gacanta 'app'. Nidaamka WICShopper app maaha kuwo laga helayo telefoonnada gacanta oo dhan.

Kala doorashada cuntooyinka WIC

Liiskaaga Cuntada WIC u isticmaal dukaanka adigoo wata lacagtii cuntada ee kuu hartay si ay kaaga caawiso in aad kala doorato cuntooyinka WIC.

Liiska Cuntada WIC wuxuu kuu tilmaamaa noocyada cunto ee kala duwan ee shirkaduhu sameeyaan, qiyaasaha iyo noocyada cuntooyinka aad gadan karto.

Waxaad isticmaali kartaa nidaamka WICShopper ee la isticmaalo telefoonka gacanta 'smartphone app' si aad u ogaato in aad cunto ku gadan karto gargaaradaada WIC.



Haddii aad taageero uga baahan tahay, waydii shaqaalaha dukaanka.

Marka aad joogto meesha lacagta laga bixiyo

Marka hore isticmaal kaarkaaga eWIC inta aadan isticmaalin SNAP ama hababka kale ee lacagta loo bixiyo.

1-aad → **2-aad** → **3-aad**

lacag
debit-ka
credit-ka

Waxaad xaqiijisaa in waxa aad ku gadanayso WIC ay sax yihiin ka hor intaadan isticmaalin hababka kale ee lacagta loo bixiyo.

Marka u horreysa ee aad dukaanka u isticmaasho kaarkaaga eWIC:

U sheeg shaqaalaha lacagta qabta 'cashier' in aad dib u isticmaalayso kaarkaaga eWIC.

Weydii in lagaa rabo in aad cuntooyinka aad ku gadato WIC ka saarto cuntooyinka kale.

Weydii marka ay tahay in aad kaarka mariso iyo marka aad gelinayso PIN lambarkaaga.

Faa'iidooyinka faruutada iyo khudradda

Marka aad isticmaasho dhammaan lacagtii faruutada iyo khudradda ee kuu hartay, waxaad:

Wixii lacag ah ee dheeraad ah u bixin kartaa lacag ahaan, jeeg ahaan, debit ahaan, credit ahaan, ama Kaarka Cayrta ee Oregon.

AMA

Qofka dukaanka ka shaqaynaysa la socodsii faruutada iyo khudradda aad jeclaan lahayd in aad dib u celiso.

Akhrinta xaashidaada risiitka

Qaybta hore waxaa ku qoran cuntooyinka aad hada gadatay.

Qaybta hoose waxaa ku qoran **Lacagta Kuu Hartay**.

Maanta waa maalintii u dambaysay ee aad cuntooyinkaaga WIC gadan lahayd bishan.

Tani waa tirada cuntada WIC ee kasta ee kuu hartay in aad gadato bishan. Faruutada iyo khudradda kaliya ayaa la tilmaamay iyadoo lacag ahaan doolar ah.

Tusaale:

256.00 oz waa 256 ounces
16.00 $$$ waxay u dhigantaa $16.00
3.00 ctr waa 3 caagadood

Kuwani waa cuntooyinka WIC ee kuu hartay si aad u gadato bishan.

OREGON GROCERY STORE
800 NE OREGON ST
PORTLAND OR 97232

STORE ID:	ABC123
TERMINAL ID:	C999999999
CLERK ID:	9876
DATE & TIME:	09/15/2015 04:21 PM
CARD:	**********1234
AUTH NUMBER:	123456

WIC PURCHASE

QTY	UNITS	DESCRIPTION	PRICE
8.00	OZ	BABY FOOD BANANA 4OZ	
		2.00 @ $0.79	1.58
16.00	OZ	INFANT CEREAL 16OZ	
		1.00 @ $3.50	3.50
1.00	GAL	MILK FAT FREE GAL	
		1.00 @ $3.19	3.19
0.25	GAL	MILK FAT FREE QT	
		1.00 @ $1.39	1.39
1.00	CTR	ORANGE JUICE 12 OZ	
		1.00 @ $2.49	2.49
3.68	$$$	GRAPEFRUIT FRESH	
		1.00 @ $3.68	3.68

APPROVED PURCHASE TOTAL 28.49

BALANCE DUE - $ 0.00

BENEFITS EXPIRE ON 09-30-2015

QTY	UNITS	DESCRIPTION
1.00	LB	CHEESE
0.00	DOZ	EGGS - LARGE
21.50	OZ	CEREAL - HOT/COLD
1.00	CTR	PEANUT BUTTER/BEANS
1.00	CTR	DRY BEANS OR PEAS
8.00	OZ	BABY CEREAL
248.00	OZ	BABY FOOD - FRUIT/VEG
77.50	OZ	BABY FOOD - MEAT
32.00	OZ	WHOLE GRAINS
6.32	$$$	FRUIT AND VEGETABLES
3.50	GAL	FAT FREE OR 1% MILK
1.00	GAL	WHOLE MILK
2.00	CTR	FRUIT JUICE 11.5-12OZ
2.00	CTR	JUICE 64OZ/16OZ

****PLEASE SAVE THIS RECEIPT****

Gadashada caanaha ama caanaha soy milk

OREGON GROCERY STORE
800 NE OREGON ST
PORTLAND OR 97232

STORE ID: ABC123
TERMINAL ID: C999999999
CLERK ID: 9876
DATE & TIME: 09/15/2015 04:21 PM
CARD: **********1234
AUTH NUMBER: 123456

WIC PURCHASE

QTY	UNITS	DESCRIPTION
16.00	OZ	WHL WHEAT BREAD 16 OZ
		1.00 @ $2.53

BENEFITS EXPIRE ON 09-30-2015

QTY	UNITS	DESCRIPTION
3.50	GAL	FAT FREE OR 1% MILK
1.00	GAL	WHOLE MILK
1.00	CTR	PEANUT BUTTER/BEANS
1.00	CTR	DRY BEANS OR PEAS
2.00	CTR	FRZN JUICE 11.5-12OZ
2.00	CTR	JUICE 64OZ/16OZ
1.00	LB	CHEESE
2.00	DOZ	EGGS - LARGE

Tusaalooyin:

1.00 GAL waa

gallon

0.75 GAL waa

gallon-barkii

+

quart

0.50 GAL waa

gallon-barkii

0.25 GAL waa

quart

Gadashada looska la shiiday & digirta



OREGON GROCERY STORE
800 NE OREGON ST
PORTLAND OR 97232

STORE ID: ABC123
TERMINAL ID: C999999999
CLERK ID: 9876
DATE & TIME: 09/15/2015 04:21 PM
CARD: **********1234
AUTH NUMBER: 123456

WIC PURCHASE

QTY	UNITS	DESCRIPTION
16.00	OZ	WHL WHEAT BREAD 16 OZ
1.00	@ $3.59	

BENEFITS EXPIRE ON 09-30-2015

QTY	UNITS	DESCRIPTION
3.50	GAL	FAT FREE OR 1% MILK
1.00	GAL	WHOLE MILK
1.00	CTR	PEANUT BUTTER/BEANS
1.00	CTR	DRY BEANS OR PEAS
2.00	CTR	FRZN JUICE 11.5-12OZ
2.00	CTR	JUICE 64OZ/16OZ
1.00	LB	CHEESE
0.00	DOZ	EGGS - LARGE
21.50	OZ	CEREAL - HOT/COLD
8.00	OZ	BABY CEREAL

1.00 CTR waa

16-18 oz

AMA

16 oz

TILMAAN:

Haddii aad haysato mid ka mid ah kuwani:

32 oz

1.00	GAL	WHOLE MILK
2.00	CTR	PEANUT BUTTER/BEANS
2.00	CTR	DRY BEANS OR PEAS
2.00	CTR	FRZN JUICE 11.5-12OZ

1.00	GAL	WHOLE MILK
2.00	CTR	PEANUT BUTTER/BEANS
2.00	CTR	DRY BEANS OR PEAS
2.00	CTR	FRZN JUICE 11.5-12OZ

waxaad u isticmaali kartaa in aad ku gadato 32 ounce oo ah bacaha ay ku jiraan digirta qalalan ama misirta.

Gadashada casiirka

Lacagta cuntada ee kuu hartay fiiri si aad u ogaato:

- Halka aad ka heli karto cunto la qaboojiyay ama cabitaanka dhalada ku jira
- Qiyaasta cabitaanka aad gadan karto

2.00	CTR	DRY BEANS OR PEAS
1.00	CTR	FRZN JUICE 11.5-12OZ
1.00	CTR	JUICE 64OZ/16OZ
1.00	LB	CHEESE

1.00 CTR waa:

11.5-12 oz la qaboojiyay

2.00	CTR	DRY BEANS OR PEAS
1.00	CTR	FRZN JUICE 11.5-12OZ
1.00	CTR	JUICE 64OZ/16OZ
1.00	LB	CHEESE

1.00 CTR waa:

64 oz dhalooyinka caaga ah

AMA

16 oz la qaboojiyay

Xusuusnow...

Haddii shay aad gadanayso uu noqon waayo mid ka mid ah cuntada WIC:

- Waxaa suuragal ah in aadan haysan lacag kugu filan **oo kuu**hartay.
- Waxaa laga yaabaa **in aanay ku jirin** Liiska Cuntada WIC.

Haddii ay tani dhacdo, shaqaalaha lacagta qabta 'cashier' ma beddeli karo tani ama kuuma ogolaan karo in aad cuntadaasi ku gadato kaarkaaga WIC.

Sharciyada wax ku gadashada WIC

- Waxaa laguu ogol yahay in aad xaashida lacag dhimista 'coupons', kaararka dukaanka ee loogu tala galay macmiilka joogtada ah isticmaasho, aad mid ka mid ah gadato /lagu siiyo iyo waxyaale oo gaar ah marka aad wax ku gadanayso WIC.
- Kuwa beddelka ah lama ogola. Ha isku dayin in aad gadato cuntooyinka ama caanaha carruurta 'formula' ee aanan ku qornayn Liiskaaga Gargaarka.
- Ha codsan jeegaga gadaal laga isticmaalo 'rain checks' ama nooca IOU.
- Marnaba ha isku dayin in aad gado, ka ganacsato ama bixiso cuntooyinkaaga WIC, caanaha carruurta 'formula' ama kaarka eWIC.
- Ha soo celin cuntooyinka WIC ama caanaha carruurta 'formula' si aad u weydaarsato lacag, credit ama waxyaalo kale.
- Si xushmad leh ula dhaqan WIC iyo shaqaalaha dukaanka.

Su'aalaha?

Marka ay tahay in la waco xaruntaada WIC

- Marka aad hayso su'aalo ku saabsan cuntooyinka WIC ama tiradooda.
- Marka aad awooddi waydo in aad gadato cunto aad u malaynayso in ay WIC ogolaatay.

Marka ay tahay in la waco Adeega Macmiilka eWIC

- Marka kaarkaagu lumo, la xado ama waxyeelo soo gaarto.
- Marka aad rabto in aad mar kale samaysato PIN lambarkaaga.
- Haddii aad u malaynayso in xaashidaada risiitku aanay u dhigmin waxa aad gadatay.

Waaxdani waa fursad shaqo bixiye loo wada siman yahay. Sida ku cad xeerka Federaalka ee sharciga xuquuqda dadweynaha iyo xeerarka u yaala xuquuqda dadweynaha ee Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA), USDA, Waaxyaheeda, xafiisyadeeda, iyo shaqaalaheeda, iyo hay'adaheeda kala duwan ee ka qayb qaadanaya ama maamulaya barnaamijyada USDA waxay ka mamnuucaysaa kala takoorida la xiriirta jinsiyada, midabka, dalka laga soo jeedo, lab ama dhidig, naafanimada, da'da ama aargoosiga, ama aargoosiga ku saabsan xiriir hore oo lala lahaa dhaqdhaqaaq u dooda xuquuqda dadweynaha oo ka tirsan barnaamij ama hawl ay samaysay ama maal-gelisay USDA. Dadka naafada ah ee u baahan noocyo kale oo isgaarsiin oo loogu tala galay macluumaadka barnaamijka (tusaale, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille, farta waaweyn, cajalada la duubo, Nooca Luqadda Dadka aan wax Maqli karin ee Maraykanka, iwm.), waa in ay la xiriiraan Hay'ada (Gobolka ama degaanka) halka ay ka dalbadeen gargaarada. Shakhsiyaadka aan dhagaha wax ka maqlin, aanan si fiican wax u maqli karin, ama dhibaato hadal qaba waxay la xiriiri karaan USDA iyagoo isticmaalaya Adeega Gudbinta ee Dawladda Dhexe 'Federal Relay Service' (800) 877-8339. Intaasi waxaa dheer, macluumaadka barnaamijka waxaa suuragal ah in ay jiraan iyagoo ku qoran luqaddo aan ka ahayn Af-Ingiriisiga. Si aad cabasho kala takoorida ah u gudbiso, buuxi Foomka Barnaamijka Cabashada Kala takoorida ee USDA (AD-3027) (USDA Program Discrimination Complaint Form), ee laga helo bogga internet-ka http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html, ama xafiis kasta oo ay leedahay USDA, ama qor warqad lagu hagaajo USDA waxaanad warqada ku bixisaa dhammaan macluumaadka lagu codsaday foomka. Si aad u codsato foomka cabashada, wac (866) 632-9992. Foomka aad buuxisay ama warqada u gudbi USDA adigoo isticmaalaya: (1) Boosta: U.S. Department of Agriculture, Office of the Assistant Secretary for Civil Rights, 1400 Independence Avenue, SW, Washington, D.C. 20250-9410; (2) fax-ka: (202) 690-7442; ama (3) email-ka: program.intake@usda.gov

www.healthoregon.org/wic

57-1002 SOM (11/2015)